
# Lamaanayaasha aan IsQabin, Deynta, iyo Hantida

Unmarried Couples, Debt, and Property

## Ma jiraan wax xeerar ah oo ku saabsan daynta ama hantida haddii anaan is guursan laakiin aan wada joognay muddo?

Kolka ay dadku is guursadaan, waxaa jira xeerar sharci ah oo quseeya xiriirkooda. Xeerarkaasi sidoo kale waxa ay maamulaan waxa la yeeli hadii guurkoodu uu furiin ku dhamaado. Tusaale ahaan, kolka labo qof oo isqabtay ay is furaan, sharciga Minnesota waxa uu yiraa wixii hanti ah ee ay wada lahaayeen waa in si xaq ah loogu qaybiyo labada qof. Xisaabta laguma cid walba waxa ay bixisay. Kolka lamaanayaashu ay wada nool yihiin iyagoon isqabin xeerarka caynkaa ahi ma quseeyaan iyaga.

Hadii adiga iyo qofka kale ee noloshu idinka ka dhaxaysaa aydnaan doonayn inaad is guursataan, waa ra'yi wacan kolkaa in aad labadiinu go'aansataan waxa laga yeeli waxyaabaha aad wada leedihiin hadii uu xiriirkiinu uu dhamaado ama hadii labadiina midkood ay wax gaaraan. Hadii arrintu ay maxkamad gaarto, aad bay u fududeyn arrinta hadii labadiinu aad heshiis sii sameystaan marka horeba.



## Ma mas'uul baan ka ahay deynta qofka noloshadu naga dhaxayso?

La noolaanta aad wada nooshihiin uun mas'uul ugama thihid deynta qofka noloshu idin ka dhaxayso lagu leeyahay. Waxa kaliya oo aad mas'uul ka tahay deynta aad adigu ogolaatay inaad bixiso. Taa macnaheedu waa hadii aad saxiixdo heshiis oranaya inaad bixin doonto deynta.

Hadii adiga ama qofka ay noloshu idin ka dhaxayso la idinku leeyahay deyn aad labadiinuba magacoodu ku qoran yahay, kolkaa labadiinuba mas'uul ayaad ka tihiin inaad bixisaan.

**Tusaale ahaan:** hadii aad leedihiin kaar amaah (credit card) oo labadiinuba aad ku wada qoran tihiin, kolkaa waa in labadiinuba aad hubisaan in khasiraadyada la bixiyo. Cidii rabtaa iyadu ha ku soo gadato kaarka alaabta khasiraadeeda la bixinayo ama hadii labadiina midkood uusan doonayn in alaabtaa la gato.

## Ka waran haddii lamaanahaygu uu ku qaatay deyn magacayga anigoon ogayn?

Sharci cusub oo Minnesota leedahay ayaa ku caawin kara haddii lamaanahaagu uu ku qaatay deyn magacaaga (kaar deyn) adigoon ogeyn. AMA haddii uu lamaanahaagu uu kugu khasbay ama kuugu hanjabay inuu wax ku yeeli haddii aadan qaadan deynta. Arrintan waxaa la yiraa

tacadi dhaqaale. Iminka waxa aad waydiisan kartaa maxkamaddi inay kaa dhaafto adiga bixinta deyntaa. Waa khasab inaad tahay dhibane tacadi qoyska dhexdiisa ah loo geystay, dhibane khashkhashaad, ama tahriibin dhanka galmada ama shaqadda ah loo geystay si aad u awoodo inaad codsato cafiskan.

Waa khasab inaad ku ogaysiiso amaah-bixiyeesha qoraal ahaan aadna siiso qoraaladda sharxaya xaaladda aadna u cadeyso sababta aadan mas'uulka uga ahayn amaahda. Kuwaasi waxa ay noqon karaan waxyaabaha sidda:

- warbixin booliis
- warbixin musuq/xatooyo magac ka hadlaysa
- amar furiin oo maxkamadeed, ama
- oraah qoraal ah oo dhaar ah oo aad adigu siinayso amaah-bixiyaha

Waxa aad waydiisan kartaa maxkamadda inay kaa dhaafto bixinta deynta ama ay xukunto in lamaanahaagu uu mas'uul ka yahay deynta. Waxaad kaloo maxkamadda waydiisan kartaa inay ka dhigto galka dacwadda mid qarsoodi ah. Haddii aad u baahan tahay inaad ka nabadgasho tacadi mustaqbalka ah.

Sharcigani ma quseeyo deynta hantida lagu qaato. Deynta hantida ku salaysan waa deynta leh "curaarta." Sidda, gaari dib loo qaadan karo haddii aadan bixin lacagta deynta gaarida ama guri lala wareegi karo. Waxay kaloo kaliya quseeysaa deymaha cusub ee la qaato ka dib bisha Janaanyo 1, 2024. Uma isticmaali kartid sharcigan deymo hore oo ka horeeyey kolkaa.

## Waxa aan samaysanay heshiisyo afka ah, taasi miyey ku filan tahay arrimaha?

Dhibka sameysiga heshiiska afka ahi waxa weeye waaa ay adkaan kartaa in la cadeeyo. Waa ay adkaan kartaa in laga dhaadhiciyo xaakim in uu jiray heshiis afka ah aadna adigu u hogaansantay heshiiska qaybtaadii.

**Tusaale ahaan:** hadii aad ogolaatay inaad dib u habayn casriyeyn ah aad ku sameyso guriga in laguugu bedeli taana ay tahay in magacaaga lagu qoro guriga, kolkaa waxaad u baahan tahay inaad tusto xaakimka cadeyn ah inaad qabatay shaqada dib u habeynta ah, inta ay tahay lacagta iyo waqtiga aad gelisay hawsha iyo waxa ay ku dartay qiimaha guriga. Waxa aad u baahan tahay inaad ka dhaadhiciso xaakim inaad waxyaabahaas aad u sameysay sababtoo ah waxa aad aaminsanayd in heshiis uu jiro. Maadaama aysan jirin wax dukumiinti qoran ah oo uu xaakimku eegi karo, waxa ay isugu soo aruuri cidda uu xaakimku rumeeyo warkeeda. Waa lagaaga adkaan karaa dacwadaada hadii xaakimku uu rumeeyo warka qofka kale ee noloshu idinka dhaxayn jirtay ee uusan adiga warkaaga aaminin.

Hadii aadan haysan heshiis qoran, kuma filna in qofka noloshu idin ka dhaxayso uu ogolaado inuu kula wadaago dakhligiisa ama uu ku qoro magacaaga warqada mulkiga guriga si wax kale loogu bedesho kuwaa. Sidoo kale kuma filna inaad tiraahdo heshiiskiinu waxa uu ku salaysanaa "isu aaminid qoys ahaan."

Hadii adiga iyo qofkii noloshu idin ka dhaxaysay aad is dagaashaan ay arrintuna maxkamad gaarto kolkaa heshiiska qorani waxa uu fududeyn karaa wax walba.



Hadii aadan haysan heshiis qoran, alaabta aad soo gadatay intii aad wada jirteen badanaa waxaa la kala qaybiyaa iyadoo la eegayo cidda bixisay lacagta alaabtaa. Wixii lacag ah ee labadiinu aad haysataan waxa la kala qaybin iyadoo la eegayo cidda kasbatay. Wixii wadajir loo wada gato waa la kala qaybin ama waxaa dhici karta in labadiina midkood uu kan kale u celiyo lacagta uga baxay gadashada alaabtaa.

**Tusaale ahaan:** Hadii guri aad ku gadateen labadiina magacba, maxkamadu waxa ay u kala "qaybin" ama u kala goyn xaquuqdiina sida is le'eg. Maxkamadu waxaa dhici karta inay xukunto in labadiina mid walbaa uu xaq u leeyahay kala barow bar guriga (50-50). Ama maxkamadu waxa ay xukumi kartaa in labadiina midkood uu helo xaq ka yar ka kale. Maxkamadu waxa ay amri kartaa in guriga la gado lacagtana loo kala qaybiyo iyadoo la eegayo qof walba saamigiisa.

Hadii qofka nolosha idin ka dhaxaysaa uu guriga isagu leeyahay aadana haysan heshiis qoran, aad bay u adag tahay in laga dhaadhiciyo maxkamada inaad guriga xaq u leedahay. Waxa aad u sheegi kartaa maxkamada lacagta ama waqtiga aad gelisay hagaajinta guriga, lacagta aad ku kharash garaysay kharashaadka qoyska, ama waqtiga aad gelisay daryeelida ilmaha, laakiin waxaa dhici karta in mar walba ay maxkamadu xukunto inaadan wax xaq ah aadan ku lahayn guriga aana waxba aadan ka helin wixii aad sameysay oo dhan.

## Heshiisyada qoraalka ah

In wax walbaa qoran yihiin badanaa waa ra'yi wacan. Adiga iyo qofka noloshu kaala dhaxaysaa waa inaad ka fakartaan inaad sameysataan "heshiiska wada noolaanshaha." Heshiiska wada noolaanshahu waa heshiis qoran oo u dhaxeeya 2 diina oo tilmaama hantida iyo lacagta xiriirkiina kalana dhigdhiga waxa aad doonaysaan in la yeelo hadii uu xiriirkiinu dhamaado.

Hadii uu xiriirkiinu dhamaado, waad og tihiin cid walbaa hantida ay helayso iyo cidda walbaa deynta ay bixinayso.

Heshiisyada wada noolaanshahu ma ay bedelaan dardaaranka, laakiin maxkamadu waa ay oofin hadii xiriirku uu dhamaado iyadoo sababtu tahay in midkood labada qof ee noloshu ka dhaxaysaa uu geeriyoodo.

Gobolka Minnesota**, heshiisyada wada noolaanshahu waa inay qoraal noqdaan si ay u noqdaan kuwo la oofin karo**. Hadii adiga iyo qofka ay noloshu idin ka dhaxaysaa kaliya aad leedihiin heshiis afka, maxkamadu ma ay oofin karto taa. Heshiiska qoraalka ah waxa aad u baahan tihiin inaad ku qortaan dhamaan waxyaabaha muhiimka ah ee adiga iyo qofka noloshu idin ka dhaxaysaa aad ku heshiisaan ka dibna waxa aad u baahan tihiin in labadiinuba adiga iyo qofka noloshu idin ka dhaxaysaa inaad aad saxiixdaan heshiiska.

## Sidee ayaan ku ogaan karaa inaan u baahnahay Heshiis Wada Noolaansho?
Heshiisyada wada noolaanshaha ahi waxa ay sheegaan waxa laga yeeli hantida, lacagta, iyo deymaha. Waa ra'yi fiican inaad hesho iyaga mar walba oo aad la nooshahay qofka noloshu idinka dhaxaysay muddo dheer ama aad la wadaagto dakhli iyo hanti. Mar walba oo mudadda aad wada joogtaani ay sii koroto waa mar walba oo ay muhiim sii noqonayso inaad haysataan heshiiska wada noolaanta.



Heshiisku waxa uu noqon karaa wax aad muhiim u ah kolka ay jiraan faraq dhaqaale oo weyn oo u dhaxeeya adiga iyo qofka noloshu idinka ka dhaxayso. Sida in hal qofi uu lacagta kasbado uuna guriga leeyahay halka qofka kalena uu guriga joogo oo ilmaha daryeelo.

Waxaa jira siyaabo kale oo lagu cadeyn karo xaqaaga guriga iyo lacagta, laakiin waa ay adkaan karaan, waxaana dhici karta in loo baahdo in la siiyo waqti badan oo maxkamadeed.

## Maxaa ka dhiga heshiiska mid sharci ah?
1) Qoraal
2) Saxiix
3) "Tixgelint"

Heshiiskaagu waxa uu u baahan yahay inuu qornaado lana saxiixo. Heshiiskaaga sidoo kale waa inuu ku jiraa waxa la yiraa "tixgelin." Tixgelinta macnaheedu waa wax baad dhaafsan wax kale. Tusaale ahaan, waxa aad la wadaagi qofka noloshu idinka dhaxayso dalhligiisa adigoo taa **ku gudi** guri joogid si aad ilmaha u daryeesho. Tixgelintu ma aha inay si le'kaato. Adiga ayey kugu xiran tahay waxa aad doonayso inay noqoto, kaliya waxa aad u baahan tahay inaad ku bixiso faahfaahin iyada ku saabsan heshiiska.

## Waxa ay tahay inaysan ku jirin Heshiiskayaga Wada Noolaanshaha?
Badanaa ma aha ra'yi fiican in lagu sheego xiriir dhanka galmada ah heshiiska wada noolaanshada. Maxkamadu ma ay oofin karto heshiis u isticmaala xiriir galmo tixgelin ahaan qayb ka ah heshiiska iyo wax is waydaarsiga, kolka waxaa fiican in laga tago.

Maxkamadahu kaliya waxa ay oofiyaan heshiisyada wada noolaanshaha ah kolka uu xiriirku dhamaado. Ka bood ku darida wayaabaha ku saabsan cid walbaa hawsha guriga ee ay qabanayso ama cid walbaa khasiraada ay bixinayso inta la wada jiro. Waxa aad sameysan kartaa mid adigu aad leedahay oo kuu gaar ah, oo ah heshiis kale oo ku saabsan cidda walbaa waxa ay ka qabanayso hawsha gurigaaga, laakiin maxkamadahu ma ay oofiyaan heshiisyadaa.

## Waa maxay waxyaabaha ay tahay inay ku jiraan Heshiiskayaga wada Noolaanshaha?
Kolka adiga iyo qofka noloshu idin ka dhaxaysaa aad qoraysaan heshiiskiina, ka fakara waxyaabaha muhiimka ah ee qoyskiina quseeya. Heshiiskiinu waa uu noqon karaa mid

faahfaahsan kana hadla qayb walba oo dhaqaalaha xiriirkiina ah ama waxa uu ka hadli karaa uun dhowr wax, sida waxyaabaha waaweyn ee aad soo gadateen. Qaybahan soo socdaa waxa ay ka hadlaan waxyaabo wacan oo u baahan in laga fakaro in lagu daro heshiiska.



## Dhulka iyo Hantida kale

Waa ra'yi fiican in la qoro dhamaan dhulka iyo hantida aad adiga iyo qofka noloshu idinka dhaxaysaa aad leedihiin. Hantida waa waxyaabaha sida lacagta, xisaabaadka lacagaha dadka hawlgalbka ah la siiyo, lacagaha suuqa ku jira, iyo wixii kale ee lacag lagu bedelan karo. Adiga iyo qofka noloshu idinka dhaxaysaa waa inaad go'aansataan sida aad u wadaagi doontaan dhulka iyo cid walbaa waxa ay qaadan doonto hadii uu xiriirku dhamaado.

Waxaa jira 3 nooc hanti weyn oo ay tahay inaad ka fakartaan:

1. Hanti adiga iyo qofka aad nolosha wadaagtaani aad lahaydeen ka hor xiriirkiinar:

2. Hadiyado ama hanti aad adigu dhaxal u heshay ka dib kolkii aad bilowda xiriirkiina.

3. Hanti lala soo wareegay xilligii xiriirkiinu uu jiray. Waxaa jira dhowr nooc oo hantidan ah:

    - Waxyaabo uu mid labadiina ka mid ahi uu naftiisa uu u gato.

    - Waxyaabo aad wada jir u gadataan oo si is le'eg aad u leedihiin (50-50).

    - Waxyaabo aad wada jir u gadataan, laakiin cidda yeelanaysaa ay tahay inay ku salaysnaato inta lacag ah ee uu qof walbaa ku lahaa gadashada waxaa. Tusaale ahaan, hadii aad shay ka bixisaan $100 aadna adigu bixiso $75 qofka noloshu idin ka dhaxaysaana uu bixiyo 25% kolkaa qofka noloshu idin ka dhaxaysaa waxa ku leeyahay shaygaa 25%.

    - Waxyaababa midkiin kaliya uu soo gaday, laakiin midka kale uu gadaal wax tarmo uga gaystay. Tusaale ahaan, haddii qofka noloshu idin ka dhaxeysaa uu guri gatay, laakiin aad ogaalay inaad waqti iyo xoogba geliso guriga si aad u hagaajiso. Waa inaad go'aansataa in qofka noloshu idin ka dhaxeysaa uu kaligii guri sii lahaanayo ama in hawsha aad gelisay guriga loo xisaabinayo sidii "hanti dhidid" oo guriga aad ku leedahay oo kale. "Hantida dhidid" macnaheedu waa waxa aad ku yeelan qayb mulkiga guriga ah shaqada aad qabatay awgeed.

## Xisaabaadka Bangiga

Go'aansada adiga iyo qofku noloshu idin ka dhaxaysaa inaad kala lahaataan xisaabaadyo bangi oo kala gaar ah ama in aad lacagtiina oo dhan aad isugu keentaan hal xisaab. Xusuusnow mar walba in hadii aad wadaagtaan xisaab bangi, labadiina mid walbaa waxaa uu ka saari karaa dhamaan lacagta ku jirta xisaabta oo dhan isagoon ogolaansho ka haysan kan kale.

Hadii aad go'aansataan inaad wadaagtaan xisaab bangi, go'aansada sida lacagta xisaabta ku jirta aad u qaybsanaysaan labadiinu hadii xiriirku uu dhamaado.

Ka fakar:

- Saamiga lacagta ah ee labadiina mid walbaa uu qaadan?
- Labadiina midkiin ma geliyey lacagta badan xisaabta markii hore oo ay tahay in dib loogu cesho inta aan la qaybsan inta baaqiga ah?



## Deynta


Adiga iyo qofka noloshu idinka dhaxaysaa sidoo kale waa inaad falanqaysaan sida aad doonaysaan in loo qaabilo deynta. Waxaa jira dhowr nooc oo deymaha ah oo ay tahay inaad tix gelisaan:

1. Deynta adiga iyo qofka noloshu idinka dhaxaysaa horey la idin ku lahaa ka hor intii aydnaan bilaabin xiriirkiina. Kuwaasi waxa ay noqon karaan amaahaha ardayda, khasiraadyada kaararka deynta, lacagta masaariifta ilmaha, iwm.
2. Deymaha adiga iyo qofka nolosha idin ka dhaxaysaa uu mid walbaa gaarka u galay intii uu xiriirkiinu jiray.
3. Deymaha aad wadajirka u gasheen intii uu xiriirkiinu jiray.

U isticmaal heshiiskaaga si aad u sheegto cidda mas'uulka ka ah bixinta daymaha iyo inta ay ka bixinayso deyn walba hadii uu xiriirku dhamaado.

## Kaararka Amaahda (Credit Cards)

Waxa aad u isticmaali kartaa heshiiskaaga inaad ku go'aansataan hadii aad wadaagaysaan kaararka amaahda iyo hadii kale, kaliya inay ku qornaadaan magacaaga uun ama wuxuun isku dhaf ah. Xusuusnow, hadii adiga iyo qofka noloshu idin ka dhaxaysaa aad labadiinuba ku wada qoran tihiin kaarka amaahda, labadiinuba mas'uul ayaad ka tihiin dhamaan wixii lagu gato kaarka. Taa macnaheedu waa hadii qofka noloshu idinka dhaxaysaa uu shay qaali ah ku gato kaarka, shirkada kaararka amaahdu adiga ayey ku saari kartaa mas'uuliyada xataa hadii aadan ogayn ama aadan ogolaan gadashada shaygaa qaaliga ah. Go'aanso waxa laga yeeli kaararkaa amaahda hadii uu xiriirku dhamaado iyo cidda mas'uulka ka ah bixinta khasiraad walba oo kaararka amaahda ah.



## Arrimaha kale

Waa aad ku dari kartaa waxyaabo kale heshiiska wada noolaanshaha, sida haysashada iyo waqtiga waalidka ee ilmaha iyo go'aano muhiim ah oo ku saabsan dardaarka nolosha. Laakiin, waxaa jiri kara dhibaatooyin la xiriira oofinta qaybahaa, kolkaa hadii aad doonayso inaad ku darto heshiiska, kala tasho qareen.



## Ma bedeli karaa Heshiiskayaga Wada Noolaanshaha?

Haa. Hadii aad labadiinu aad go'aansataan inaad wax ka bedeshaan heshiiska, waa aad sameyn kartaan taa. Labadiinuba waa inaad isku raacdaan isbedelada aad doonaysaan inaad sameysaan. Isbedaladu waa khasab inay qoraal noqdaan waxa aadna labadiinu u baahan tihiin inaad saxiixdaan. Hadii kaliya aad doonaysid uun inaad wax ka bedesho qayb ka mid ah heshiiskaaga aadna ku dhaafto inta kale sida ay tahay, waa inaad taa ku sheegtaa heshiiskaaga cusub. Si cad u sheeg waxa aad bedelayso iyo in qaybaha kale ee asalka heshiiska wada noolaanshaha ahi uu sidiisii hore ahaanayo.

## Maxaa ku dhici heshiiskayaga wada noolaanshaha hadii uu midkayo dhinto?

Marka qof uu geeriyoodo, lacagta iyo hantida uu ka tago waxaa la yiraa "dhaxal." Kolka qof xile lehi uu geeriyoodo dardaaran la'aan, badanaa dhaxalkiisa waxaa leh xilaha uu ka tagay. Arritani ma quseeyso lamaanayaasha aan isqabin. Hadii aadan qofka noloshu idin ka dhaxayso aadan ku darin dardaarankaaga, wax uu qofkaasi ka helayaa ma jiraan dhaxalkaaga kolka aad geeriyooto. Halkii uu qofkaasi ka helaa lahaa, dhaxalkaaga waxaa helaya ehelada dad kuu xigta ama dowlada ayaa qaadan hadii aadan ehel lahayn.

Dadka noloshu ka dhaxayso ee aan isqabin looma xisaabiyo qoys ahaan. Heshiiska wada noolaanshaha waxa uu u wax ka **bedelaa** waxa ku jira dhaxalkaaga. Laakiin ku darida qofka nolosha idinka dhaxayso dardaarankaaga waxa ay u siin xaquuq waxyaabaha aad doonaysay inaad uga tagto.

Tusaale ahaan, waxa aad gashan jirtay dakhligaaga sannado badan xisaabtaada bangiga ee magacaaga uun ah, kolkii aad dhimatay waxaa ku jirtay 10,000 xisaabtaada bangiga. Hadii aadan lahayn dardaaran aysana jirin wax heshiis wada noolaansho ahi, kolkaa dhamaan lacagta oo dhan waxa ay noqon wax dhaxal ah waxaana dhaxlaya ehelkaa xataa hadii aad la noolayd qofka noloshu idin ka dhaxaysay 20-sanno.

Laakiin, hadii heshiiska wada noolaanshiinu uu yiraa adiga iyo qofka noloshu idin ka dhaxaysaa waxa **aad u wadaagtaan** dakhkigiina si is le'eg, kolkaa qofkaasi waxa uu xaq u yeelan kala barow bar wax walba oo ku jira xisaabtaada bangiga kolka uu xiriirku dhamaado. Kolkaa qofkii noloshu idin ka dhaxaysay waxa uu xaq u yeelan $5,000 oo ah lacagta xisaabtaada ku jirta. $5,000 oo kalena waxa ay geli hantida lagaa dhaxlayo.

Hadii adigu sidoo kale aad leedahay dardaaran uga tagaya lacagta xisaabtaada ku jira qofkaaga noloshu idinka dhaxayso, kolkaa qofkaa noloshu idin ka dhaxayso waxa uu sidoo kale heli $5,000 ee dhaxalkaaga ah.

## Isbarbar dhiga Heshiiska Wada Noolaanshaha iyo Dardaaranada

Heshiiska wada noolaanshahu waxa uu siin karaa adiga iyo qofka noloshu idin ka dhaxayso wuxuun difaac ah hadii uu xiriirkiinu uu u dhamaado geeri labadiina midkood uu geeriyood awgeed. Hase yeeshee, maadaama aad u qorayso heshiiska adigoo fahamsan in la oofin karo kolka aad kala baxdaan qofka noloshu idinka ka dhaxayso ama kolka uu midkiin geeriyoodo, kuma aad **gaaraysid go'aan la mid ah kan aad ku gaari lahayd dardaaranka.** Heshiiska wada noolaanshahu waxa uu idiin kala qaybiyaa uun waxa adiga iyo qofku noloshu idin ka dhaxayso aad haysataan. Dardaaranku waxa uu ku siiyaa ikhtiyaar ah inaad uga tagi karto wax kasta oo aad leedahay qofka nolosha idinka dhaxayso hadii aad doonayso. Dardaaranku mar walba waa jidka ugu fiican ee lagu siin karo hantidaada qofka noloshu idin ka dhaxayso kolka aad dhimato ka dib.

Isku siinta qofba qofka kale uu ku siinayo hanti dardaaranada ama heshiiska wada noolaanshaha waa wax si gaar ah muhiim u ah hadii aad ku nooshahay guri uu gaar u leeyahay labadiina midkood, ama hadii adiga ama qofka noloshu idinka ka dhaxaysaa uu faraha ka qaaday meherado shaqo oo uu hayey si uu u koroyo ilmo ama uu u daryeelo guriga. Hadii qofka nolosha idinka ka dhaxaysaa uusan wax xaq ku lahayn guriga aad adigu leedahay oo ku qoran dardaaran ama heshiiska wada noolaanshaha, qofka noloshu idin ka dhaxayso waxaa lagu khasbi karaa inuu guriga ka baxo ka dib kolka aad geeriyooto, xataa hadii qofkaasi uu ku noolaa guriga muddo dheer.

Wixii kale ee akhbaar ah ee ku saabsan dardaaranada iyo inay tahay ra'yi fiican in la hayso dardaaran, ka eeg warqada xogta aruursan ee
*Su'aalaha Inta Badan La iska Waydiiyo Dardaaranka*.

## Sidee ayaan u oofin karaa heshiiskayga wada noolaanshaha ah?

Heshiisyada wada noolaanshaha ah waxa kaliya oo oofin kara maxkamad ka dib kolka uu xiriirku dhamaado hadii adiga iyo qofka noloshu idinka dhaxaysaa aad kala baxdaan uusana qofka kale ee noloshu kaala dhaxaysay uusan doonayn inuu raaco heshiiskiina ama uu jiro guri ama hanti kale o dhul ah oo u baahan in la qaybiyo, waxa aad u baahan tahay inaad maxkamad aado si loo oofiyo heshiiskaaga. Waxa aad ka xaraysan qaan aad ugu sheegayso maxkamada heshiiskaaga iyo sida aad doonayso in loo oofiyo. Hadii ay jiraan waxyaabo kale oo badan ama lacag arrinta ku leg leh, waa ra'yi fiican inaad caawimaad ka hesho qareen.

Hadii xiriirka dhamaado iyadoo sababtu tahay in qofkii noloshu idin ka dhaxaysan uu geeriyooday, waxa aad u baahan tahay inaad la xiriirto fuliyaha hantida dhaxalka uu ka tagay qofka dhintay aadna tusto heshiiska wada noolaanshaha. Hadii qofkii noloshu idinka dhaxaysay dhaxlidiisu ay gaaro maxkamada dandaaranada iyo dhaxalka qaabilsan, waxa aad u baahan tahay inaad tuso heshiiska aad haysato. Waa ra'yi fiican inaad caawimaad ka hesho qareen inta ay hawshani socoto.

## Ka waran hadii ay ilmo naga dhaxeeyaan?



Hadii ilmo meesha ay ku jiraan la tasho qareen.

Hayshada ilmaha shaqo kuma laha mana uu oofin karo heshiiska wada noolaanshahu. Arrimaha haysashada ilmaha iyo booqashooyinka quseeya waxaa sameyn karta maxkamada qoysaska.

Waa suurtagal in loo sameysto haysasho iyo waqti waalid oo ilmood ilmo aan kuwaaga ahayn. Laakiin haysasho ma uu sharciyeyn karo heshiis wada noolaansho ahi.   Kolka aad kala baxdaan qofkii aad horey u wada joogteen adinkoon isqabin, waxaa dhici karta inaad u baahato inaad ka xareysato dacwad kale oo gaar ah maxkamad qoys oo ku saabsan haysashada ilmaha.

## Maxaa ku dhici heshiiskayada hadii aniga iyo qofka noloshu naga dhaxaysaa aan is guursano?

Hadii adiga iyo qofka noloshu idin ka dhaxaysaa aad aakhirka is guursataan, heshiiskii wada noolaanshaha ahaa mar dambe ma uu maamulayo dhanka dhaqaalaha ee xiriirkiina. Kolkaa wixii ka dambeeya xeerarka quseeya dhamaan lamaanayaasha isqaba ayaa idin quseeya. Laakiin heshiiska wada noolaanshaha waxaa wali loo adeegsan karaa in lagu qaybsado hantida adiga iyo qofka noloshu idinka dhaxayso aad lahaydeen ka hor intii aydnaan is guursan.

Ka eeg warqada xogta aruursan ee *Guurka iyo Deynta Minnesota*.



**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**